

# Tallaalada COVID-19 ee Nova Scotia

## Da'da 12 sano iyo ka weyn

### Da'da 12 -17 sano

Tallaalka ugu horeeya ee Taxanaha ah  
**Pfizer (asalka)**  
Qiyaasta xoojinta Buustartka  
**Pfizer Bivalent**

### Da'da 18 sano iyo ka weyn

Tallaalka ugu horeeya ee Taxanaha ah  
**Pfizer am Moderna (asalka)**  
Qiyaasta xoojinta Buustartka  
**Pfizer ama Moderna Bivalent**

### Inta u dhaxeeya tallaalada lagu taliyay qaadashadooda

#### Inta u dhaxeeya qaadashada taxanaha aasaasiga ah

Inta u dhaxeeya qiyaast tallaalka 1 ilaa 2 -  
**8 todobaad** (56 maalmood)

#### Inta u dhaxaysa taxanaha aasaasiga ah iyo buustarka, ama inta u dhaxaysa qiyaasaha buustarka

**6 bilood** (168 maalmood)

Dadka reer Nova Scotia ee uu **isdifaaca jirkoodu dhexdhexaad yahay ama uu aad u hooseeyo** waxey u baahanyihiin inay qaataan tallaalka sedexaad si ay u dhameystiraan taxanahooda aasaasiga ah.

- ✓ Inta u dhaxeeya qiyaast tallaalka 1 ilaa 2 -  
**4 todobaad** (28 maalmood)
- ✓ Inta u dhaxeeya qiyaasta tallaalka 2 ilaa 3 -  
**8 todobaad** (56 maalmood)

### Istallaalida kadib marka COVID-19 laga bogsado

Ka dib markaad ka soo kabsato COVID-19, waa inaad sugtaa **8 todobaad** si aad u hesho taxanaha talaalka. Haddii aad dhammaysatay taxanahaaga assaasiga ah, waa inaad sugtaa **6 bilood** si aad u hesho qiyaastaada xigta ee buustarka.



Dhamaan tallaalada mRNA (Pfizer iyo Moderna) waa **amaan, waxtar leh oo aad loogu taliyay** in COVID-19 layskaga tallaalo. Da'da dadka qaarkood, tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan kala doorashada tallaalka ayaa la bixiyay:

- » Dadka da'doodu tahay 12-29 ayaa lagula taliyay iney qaataan Pfizer (asal ah) tallaaladooda ugu horeeya.
- » Dadka da'doodu tahay 12-29 kuwa si dhexdhexaad ah ama si aad ah uu u hooseeyo is difaaca jirkoodu waxay dooran karaan iney qaataan Moderna (asla ah) beddel ahaan.
- » Dadka da'doodu tahay 18 sano iyo ka weyn waxey qaadan karaan tallaal kale haddii aysan awoodin ama ay doorbidaan inaysan qaadan tallaalka mRNA. Booqo [www.nshealth.ca/coronavirusvaccine](http://www.nshealth.ca/coronavirusvaccine) wixii faahfaahin ah (Ingiriis Kaliyah).

### Tallaalada bivalent

Hey'adda Caafimaadka Bulshadu waxey ku talineysaa in dadka reer Nova Scotia oo ay **da'doodu tahay 5 iyo ka weyn** haddii ay dhameysteen tallaalada oo dhan in ay qaataan tallaalka bivalent inta ay qaadan lahaayeen tallaalka asalka ah ee mRNA vaccine tallaalkaaga kale ee ku xiga. Inkastoo ay tallaaladu bixiyaan difaac wanaagsan, haddana bivalentiga wuxuu uga sii dheeryahay ka hortaga difaaca fayruska Omicron kala duwanaanshaha COVID-19ka.

“Bivalent” micnaahiisu waa tallaalku wuxuu kaa difaacayaa laba qeybood oo kala duwan (noocyada kala duwan) ee feyruska COVID-19ka: nooca asalka ah iyo nooca Omicronka. Tallaaladan laba geesoodka ah waxay gacan ka geystaan abuurista jawaab celin buuxda iyo kor u soo qaadista difaaca iyo muddada ilaalinta.